

Jamhuuriyada Somaliland  
Wasaaradda Kalluumeysiga  
iyo  
Khayraadka badda



Somaliland Republic  
Ministry of Fisheries and  
Marine Resources

Ku: Agaasimaha Guud ee WK&KH.

- Hargeysa-

Ku: agaasimayaasha W.K.& KH.B

-Hargeysa-

Ku: isu-duwayaaasha W.K.& KH.B

- Hargeysa-

Og: Wasiirka Maaliyadda

-Hargeysa-

Og: Madax-weynaha J.Sl

-Hargeysa-

**Uj: Soo gudbin xeer - nidaamiye**

Waxa lifaaqa warqaddan aan idinku soo gubinayaan xeer-nidaamiye ku saabsan diiwaan-gelinta iyo ruqsad siinta maraakiibta.

Run ahaantii hadda ka hor ma jirin nidaam diyaarsan oo lagu diiwaan-geliyo shirkadaha kalluumeysiga iyo mid lagu bixiyo ruqsadaha.

Sidaa baahidaas loo daboolo , dakhliga kalluumeysigan kor loogu qaado , kheyraadka baddana loo ilaaliyo ayaan u soo saaray xeerkana.

Allaa Mahad leh.

Wasiirka kalluumeysiga

Jamhuuriyada Somaliland  
Wasaaradda Kalluumeysiga  
iyo  
Khayraadka badda



Somaliland Republic  
Ministry of Fisheries and  
Marine Resources

**Xeer Wasiir No: 01/08/2012**

**05/08/2012**

- ☞ Kaddib markuu arkay: sharciga kalluumeysiga ee Somaliland qodobadiisa
- ☞ Kaddib markuu arkay: Xeerka kalluumeysiga Somaliland qodobadiisa
- ☞ Kaddib markay u muuqatey baahida loo qabo nidaam diiwaangalineed & mid ruqsad-bixineed
- ☞ Kaddib markuu tixgaliyey mas'uuliyadda wasaaradda ka saaran ilaalinta kheyraadka iyo badda deegaanka badda Somaliland
- ☞ Kaddib markii ay timid baahida in kor loo qaado dakhliga qaranka uga soo xerooda kalluumeysiga

Wuxuu soo saarey Xeer-hoosaadka diiwaangelinta shirkadaha kalluumeysi iyo ruqsad siinta maraakiibta oo tilmaamaya sida soo socota:-

#### **Diiwaangelinta shirkadaha**

1. Shirkad kasta oo damacsan ama ka shaqeysa kalluumeysiga iyo hawlah la xidhiidha kalluumeysiga waa ha ahaato mid wadani ah , mid wadaag ah ama mid ajanabi waa iney iska diiwaan-gelisaa wasaaradda Kalluumeysiga & Kheyraadka Badda.
2. Shirkadda rabta in ay is-diiwaangelineyo waa iney marka hore ahaato mid sharchiyeysan oo leh:
  - a. Laysan ganacsi
  - b. Xeer shirkadeed
  - c. Diiwaan-gelinta xeer-ilaaliyaha
3. Shirkaddaasi waa iney soo buuxisaa foomka diiwaangelinta shirkadaha (Form A) ee wasaaraadda kalluumeysiga .
4. Foomkaas ay soo buuxiso waa iney ku soo lifaaqdaa dukumentiga koobiyaasha laysanka ganacsiga, xeerka shirka, diiwaangelinta xeer-ilaaliyaha iyo dokumentiga caddeynaya hantida kallumeysiga la xidhiidha ee ay sheegatey.
5. Hantidaasi waa inuu soo caddeeyaa sarkaal ka tirsan wasaaradda ama wakiiladeeda gobolladu.

6. Shirkaddu waa iney soo bixisaa lacagta diiwaangelinta , wasaaraddan u keenta risiidka ay ku soo bixisey.
7. Waraqadda ay shirkaddu ku soo bixineys o iyo qadarka Lacagta ee ay bixineyso waxa laga qaadanayaa wasaaradda.
8. Shirkaddaha horey isku diiwaan-geliyey waa iney wasaaradda muddo bil ah gudaheega oo ka bilaabanta 5ta Ogos ilaa 4ta September dib-u-cosbooneysiyaan diiwaangelintooda iyaga oon wax lacag ah laga qaadeen.
9. Shirkaddii mudadaasi u cusooneysan diiwaangelinteeda waxay lumisay diiwaangelinteedaii, baddana kama shaqeysan karto ilaa ay dib u sameysato diiwaangelin cusub iyada oo lacagta diiwaangelinta soo bixin doonta.
10. Shirkadda wasaaradda ka diiwaangashan waa iney wasaaradda u soo gudnisaa warbixinta wax-soo saarkeeda iyo wax-qabadkeeda bil walba 30keeda.
11. Shirkadda ku xadgubta xeerka diiwaangelinta , waxa lagala noqonayaa diiwaangelintii iyo ruqsaddiiba.

### **Ruqsad siinta Maraakiibta**

- 1) Shirkad kasta oo leh maraakiib kalluumeysi oo rabta ay iney badda Somaliland ka kalluumeysto waa iney Wasaaradda ka qaadataa ruqsad kalluumeysi.
- 2) Shirkaddu waa iney marka hore ka diiwaangashan tahay Wasaaradda.
- 3) Ruqsadda kalluumeysi ga ee Wasaaraddu bixiso waxay shaqeysneysaa muddo sannad ah oo ka bilaabanta maalinta ruqsadda la bixiyo
- 4) Markabka kalluumeysga ku bilaabi waayo muddo saddex bilood gudahood , ruqsaddii la siiyey waxay bureysaa haddii muddadaas ka hor aanay shirkaddu keenin cudur daa macquul ah oo ay wasaaraddu ka aqbasho.
- 5) Haddii cuddurdaarkaa laga aqbalo waxa la siinayaa warqad muddo kordhin ah oo 45 maalmood ah inuu shaqada markabku ku bilaabo, taas oo haddii uu ku bilaabi waayo kalluumeysi markabku ay ruqsaddi si kama dambeyn ah u bureyso.
- 6) Markabka ruqsadda loo rabo waa in la soo gudbiyo tafaasiisha oo dhan sida ku cad foom B ee wasaaradda yaalla.
- 7) Shirkaddu/wakiilka markabku waa inuu keenaa wasaaradda dokumentiga wada-lahaanshaha oo maxkamad laga soo tasdiiqay haddii shirkaddu wadaag tahay.
- 8) Kaddib waa in wakiilka markabku soo bixiyaa lacagta ruqsadda.

- 9) Ruqsadda la bixinayaayi waxay ku xidhan tahay fulinta dhammaan shuruucda kalluumeysiga ee dalka iyo shurrudaha laysanka xaggiisa dambe ku yaalla.
- 10) Gaar ahaan waxaan halkan ku xuseynaa in :
  - 1) Shirkaddu/wakiilku ay ku leeyihiin Baanka Somaliland Xisaab ay ku jirto ugu yaraan lacag curaar ah oo dhan sh sl boqol iyo konton milyan ama US Dollar shan iyo labaatan kun, caddeyntana ka keenaan baanka. Lacagtaasi waxay u ooleysaa in shirkaddu ku bixiso hadba lacagta rooyaltihga ah ee ku waajibta.
  - 2) In markabku soo galo dekadda Berbera inta uuna bilaabin kalluumeysiga si loo hubiyo qalabkiisa kalluumeysi .
  - 3) In markabku soo galo dekeda Berbera inta uuna u dhoofin meesha uu kalluunka geynayo si loo hubiyo tirada iyo tayada hantida uu qaatay.
  - 4) In markabku xeebta ka fogaado ugu yaraan lix nootikal meyl ama tobant kilomitir.
  - 5) In markabku u soo gubiyo warbixinta wax-soo-saarkiisa wasaaradda iyada ay ku cad yihiin tirade iyo noocyada uu qabasaday.

Diiwaan gelinta shirkadaha wadaniga ee xeebta ka shaqeysta iyo ruqsad siinta doonyaha waxa lagu soo saarayaa xeer kale

Xeerkani waxa uu dhaqan-galayaa 5/8/2012.